

Talooyin ku socda waalidiinta kuna saabsan sida aay tahay in aay ula hadlaan carruurta xilliga furriinka

Waalidka waa in aay carruurtooda kala hadlaan waxyaabaha ayaga khuseeya. Horay uga heshiia waxaad sheegi doontaan. Haddii aay suurtoagal tahay, si wadajir ah kala hadal ilmahaaga.

Markaad la hadleysid tixgelin sii

Waalidiintu waa in aay tixgeliyaan oo ixtiraamaan fikradaha ilmahooda, xitaa haddii aay khilaafaan fikirka waalidka.

Waalidiinta go'aannada aay gaaraan ayeey ku qaataan mas'uuliyadda.

Waalidiinta waa in aay go'aannadooda u caddeeyaan ilmahooda.

Waxaa fican in aad kala hadasho ilmahaaga arrimaha sii nagaan doona iyo waxii isbeddeli doona. U sheeg ilmahaaga waxyaabaha aay arrimahaas saameyn karaan.

Qodobada soo socda waa in wada hadalka lagu xusaa:



Deegaanka



Jadwalka kulanka, maalinta ilmahala lagu wareejinayo waalidka kale iyo xaaladda isbedelka



Dugsiga iyo xannaanadda carruurta



Xayawaanka guriga lagu dhaqdo, saaxiibada iyo hiwaayadaha



Yaa alaabta raraya, maxeeyse yihiin waxyaabaha muhiimka u ah ilmaha?

Ilmaha waxaa muhiim u ah in uu ogaado:

- Furriinka ma aha qalad uu ilmaha galay.
- Ilmaha si daahfuran wuu ka hadli karaa furriinka iyo nolol maalmeedka. Waxuu fasax u leeyahay, in uu su'aalo weeydiiyo. Dhammaan noocyada dareenka waa la oggol yahay.
- Ilmuhu waxuu xaq u leeyahay, in uu sii wado xiriirka uu la leeyahay waalidka iyo dadka kale ee muhiimka u ah.
- Waalidka sida ugu fican ayeey ugu dadaalaan ilmahooda iyo waxa ugu wanaagsan.
- Ilmahu waxuu kaalmo ka heli karaa siduu u xallin lahaa lafogurista furriinka, tusaale ahaan la taliyaha dugsiga.
- Ilmaha waa loo sahli karaa macluumaadka ah, in aay jiraan ilmo kale oo aay waalidkood isfureen.
- Fayo qabka ilmaha waxaa lagu taageeri karaa macluumaadka, sida in uu waalidku u sheego furriinka qaraabada, saaxiibada, xannaanada carruurta ama dugsiga.

Macluumaadka carruurta iyo dhallinyarada ee ku saabsan furriinka waalidka

+ TALOOYINKA WADA HADALKA EE WAALIDKA



Waalidkeey weey is-furayaan. Taas macnaheedu waa maxay?

Waa muhiim, in aad fahantid. Waan kuu sharxi doonaa.



Macluumaadka carruurta iyo dhallinyarada ee ku saabsan furriinka



Heshiis

Waalidka ayaa wadajir kaga heshiia arrimaha adiga ku khuseeya. Heshiiska arrimaha lagu heshiiyay ayaa ah:

- Sidee ayuu furriinku u saameynayaa goobtaada degaanka? Ma guri kaliya ayaad daga doontaa mise waxaad u kaltami doontaa guryaha waalidkaa?
- Sideed waqtigaaga u qaadan doontaa oo aad ula xiriiri doontaa waalidkaa?
- Waalidkaa si wadajir ah miyeey u go'aamin doonaan arrimahaaga, mise hal waalid ayaa go'aannadaada go'aaminaya?

Marka heshiiska la sameynayo, fikirkaaga iyo rajadaadu waa muhiim. Waad sheegi kartaa haddii aad doonto. Dadka waaweyn shaqadoodu waa in aay ku dhageeystaan, si aay u tixgeliyaan rajadaada. Ugu dambeynna, waalidka waxeey qaadanayaan go'aanka nuqulka heshiiska.

Adiga waa kugu adkaan kartaa in aad sheegtid fikirkaaga, haddii aad ka baqeysid in qalbiga waalidiintaa uu xumaado.

Mar marka qaarkood waalidku waa kala fikir duwanaan karaan. Adiga ma u baahnid, in aad dhinac dooratid. Adiga labada waalidba si isku mid ah ayaad u wada jeclaan kartaa.



Ka hadalka furriinka

Waad ka hadli kartaa oo aad su'aali kartaa. Waxaa laga yaabaa, in aad fikrado badan iyo dareen badan ka qabtid arrimaha khuseeya furriinka. Xaqiiqda ayaa ah go'aanka furriinka waalidkaa, in aadan adiga sabab u aheyn.



Adiga waxaad xaq u leedahay in aad dareen waalidnimo u heeysid labadaada waalid

Xaq ayaad u leedahay, in aad dareen waalidnimo u heeysid labadaada waalid, xataa haddii aad la nooshahay hal waalid keliya.

Xaquuqdaada waxaa loo taabogalin karaa siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan waxaad waqti la qaadan kartaa waalidkaa ama waxaad ku kulmi kartaan meel kale sida goobaha hiwaayadda. Arrinta kale ee habboon ayaa ah, in aad wacdid ama aad farriin qoraal u dirtid.



Shaqaalaha ilaaliya danta ilmaha

Shaqaalaha ilaaliya danta ilmaha ayaa ka caawin kara waalidkaa in aay ka heshiiaan arrimahaaga furriinka ka dib. Shaqaalaha ilaaliya danta ilmaha, shaqadiisu waa in uu hubiyo si heshiiska waalidkaa uu u noqdo mid dantaada lagu taabogaliyo.



Danta ilmaha

Danta ilmaha waxeey taabogashaa, marka aad badqabtid wanaagna aad dareemeysid. Haddaba markaas ayaad qalbiga siin kartaa arrimahaaga, saaxiibadaa, ciyaaraha iyo waxbarashadaba. Waalidka iyo dadka kale ee waaweyn waa in aay tixgeliyaan dantaada goorta aay go'aanka gaarayaan.

Xaggeed caawimaad ka heli kartaa?

Arrimaha furriinka waxaad kala hadli kartaa sidoo kale dadka kale oo aan waalidkaa aheynin:

- Waxaad kala hadli kartaa la taliyaha dugsiigaaga.
- Waxaad waci kartaa khadka teleefonka carruurta iyo dhallinyarada 116 111 (Mannerheimin lastensuojeluliitto, MLL). Qof weyn ayaa teleefanka kaaga jawaabi doona luqadda finnishka. Waxaad qofkaasi kala hadli kartaa wax walba.
- Kuwa da'doodu 12-jir iyo waxii ka weyn ah, waxeey kula sheekeysan karaan luqadda finnishka Sekasin.fi-chat-ka wax walba oo maskaxdooda ku jira oo caqabad ku ah, chat-ka sheekeysiga uma baahnid in aad magacaaga sheegtid.

